

Cadaadis-cabbirka dheefmareenka



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus
Medisinsk poliklinikk
Lovisenberggt. 17
Telefon: 2322 5720

Cadaadis gaas cabbirid

Manometri

Trykkmåling manometri 01-2020 Somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

ØSOFAGUS-MANOMETRI

=

DHEEFMAREEN-CADAADIS GAAS CABBIIR

Ujeeddo

Ujeeddadu waa in la baaro dhaqdhqaqa dheef-mareenka iyo muruqa kala xira caloosha iyo tuubbada dheef-mareenka.

Diyaargaroobid

Waa inaad soontid 6 saacadood baarista kahor. Taasoo micneheedu yahay inaadan wax cunin 6-daa saacadood.
Waad cabbi kartaa bakeeri biyo ah ilaa 2 saacadood kahor baarista haddii aad oomman tahay.

Baarista

Tuubbo (4,2 mm) ayaa la geliyaa daloollada sanka midkood oo lasii mariyaa dheef-mareenka ilaa kiishka caloosha. Waad fadhiyaysaa inta lagu gelinayo tuubbada. Inta cabbiristu socoto waad jiifaysaa.

Waxaad cabbaysaa biyo cusbo leh oo yara diirran qaarba mar si loo tijaabiyo dhaqdhqaqa muruqyada markaad wax liqaysid.

Baaristu waxay qaadataa 10-15 daqiqadood.

Baarista kadib

Baarista kadib ma jirto wax gooni ah oo ay tahay inaad samaysid.

Dhibaatooyin

Aad bay u yar tahay in baaristu keento wax dhibaato ah.

Natiijada baarista

Dhakhtarkii baarista kuusoo diray ayaa loo sheegayaanatiijada baarista. Mararka qaarkood ayay dhacdaa inaan jawaabta haddiibana toos u bixin karno haddii aan aragno waxyaabo gaar ah, laakiin inta badan waxaan u baahannahay waqtii aan kaga baaraa-degno natiijada baarista kadib.

Haddii loo baahdo, waa lagu siin karaa caddayn qoraal ah inaad timid baaristaan. Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo caddaynta fasaxa bukaanka si aad u samaysid baarista.

Gaas-cabbirka waxaa inta badan la raaciyaan baarista 24 – saacadood ee cabbirista heerka aashitada oo la sameeyo kadib baaristaan.